# BAABKA 1AAD

# GUURKA IYO XULASHADA GACALKA

## 1- GUURKA

قَالَ اللهُ تَعَالَى: {وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِّتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُم مَّوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ} {سورة الروم:21}.

**(Calaamadihiisa** "awooddiisa iyo inuu keligiis in la caabbudo mudan yahay tusinaya" **waxaa kamid ah inuu naftiinna xaasas idiinka abuuray saad ugu degtaan, wuxuna idin dhex dhigay kalgacaltooyo iyo naxariis, dhab ahaantii taasi waxay calaamado** "lagu waana qaato" **u tahay qolo fekeraysa)** (Ar-Ruum: 21).

Thowbaan *(RC)* wuxuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Midkiin ha yeesho qalbi Eebbe ku mahadin og, carrab Eebbe xusid badan iyo haweenay mu'minad suubban ahoo Aakhiradiisa ku kaalmaysa)[1].**

Ereyga Guur, luqad ahaan waxa loola jeedaa shay inta meel laga raro meel kale loo raro. Waa ta ay reerku guuraan, waana ta kolka jarta ama godagodowga, iwm, la ciyaarayo, dhagaxana meel laga rarayo oo meel kale loo rarayo la yiraahdo waa la guurayaa. Sidaas darteed, gabadha waxa laga guuriyaa guriga waalidkeed, waxana loo guuriyaa ama loo gelbiyaa guriga ninkii xirtay ama xalaalaystay.

Shareecada Islaamka kolka laga eego, guurku waxa uu ka kooban yahay laba qaybood oo isku lifaaqan. Qaybta hore oo ah meherka waxa weeye in gabadha lagu nikaaxo ama lagu xiro loona xalaaleeyo nin geeya oo guur u qabto, sharci nikaaxeeda ka reebayaana aanu jirin. Qaybta labaad ee guurku waxa weeye in gabadhii la nikaaxay ninkii lagu nikaaxay loo guri geeyo ama loo aqalgeliyo ama loo gelbiyo amaba loo dhiso, hadba siday qolo waliba u taqaan. Haddaba guurku shareeco ahaan waxa weeye xalaalayn iyo guri geyn.

Guurku waxa weeye heshiis Aadane dhex mara kan ugu qiimi badan, sababtoo ah waxa uu khuseeyaa qofka laftiisa. Heshiiska labada qof ku dhex mara guurku kuma saabsana xoolo iyo umuuro adduunyo oo lagu heshiinayo, balse waxa uu labada ruux iskula xirayaa xarig kalgacayl iyo naxariis. Waxa uu sababaa ubad dhasha, wuxuuna xubnaha taranka ka ilaaliyaa galmada xaaraanta ah.

### UJEEDDOOYINKA GUURKA

Eebbe Subaxaanahu wa-Tacaale markuu guurka jideynayay, wuxuu ka lahaa ulajeeddooyin gebi ahaanba maslaxadda addoomadiisa iyo danohooda u adeegaysa. Ujeeddooyinkaas waxaa kamid ah, kuwa soo socda:

#### 1- Habaynta Isu-dhaxa:

قَالَ اللهُ تَعَالَى: {فَانكِحُواْ مَا طَابَ لَكُم مِّنَ النِّسَاءِ مَثْنَى وَثُلاَثَ وَرُبَاعَ فَإِنْ خِفْتُمْ أَلاَّ تَعْدِلُواْ فَوَاحِدَةً} {سورة النساء: 3}.

**(Dumarka wixii idiin dhadhamaya laba labo, saddex saddex iyo afar afar u guursada, haddaad ka baqdaan in aad garsoori weydaanna mid keliya guursada)** (An-Nisaa': 3).

Qoyska ka aasaasma guurka sharciga ah, rabitaankiisa waxa lagu habeeyay qaab xalaal ah iyo labada qofe isqaba oo markaas wixii uu

[1] ***Tirmidi** (3094), **Ibnu-Maaja** (1856)*

Eebbe u qoray ku qanacsan. Sidaas buu mid waliba midka kale ugu raaxaystaa, rabitaankiisana qaab xalaal ah uga haqabtiraa.

Sidaas darteed, waxaynu Qur'aanka kariimka ah iyo Sunnada Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* labadaba ku aragnaa qoraallo fara badan oo qofka inuu uursado ku boorrinaya.

Cabdullaahi Ibnu-Mascuud *(RC)* wuxuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyey: **(Dhallinyarooy, kiinnii guur awoodaa ha guursado, maxaa yeelay guurku aragga waa u dabool ibtana waa u dhufays, kaan awoodinna ha soomo, soonkaa shahwada ka jebinayee)[1].**

Aanas ibnu Maalik *(RC)* wuxuu isna Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Guursada mid ninkeeda jecel oo dhalid badan, qiyaamaha ayaan isku kiin badinayaaye)[2].**

**2- Dhawrista Faraca iyo nooca Aadanaha:**

**قَالَ اللهُ تَعَالَى: {يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُواْ رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُم مِّن نَّفْسٍ وَاحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالاً كَثِيرًا وَنِسَاء} {سورة النساء: 1}.**

**(Dadoow, ka baqa Rabbigii naf keliya** "Aadan" **idinka abuuray, iyadana lammaanteedii** "Xaawo" **ka abuuray, labadoodana rag fara badan iyo dumar ka baahiyay)** (An-Nisaa': 1).

Guurka iyo dhisidda qoysku waxay dhawraan nooca Aadanaha iyo faraciisa (tafiirtiisa), waana waddada keliya ee jiritaanka abuurka Aadanaha lagu ilaalin karo. Sidoo kale waa dariiqada qura ee ay dadku ku tarmaan, ilaa iyo inta uu Alle arlada iyo waxa dul saaran ka oofsanayo, taasi oo ah maalinta Aakhiro.

Qur'aanka kariimka ahi xikmaddaas bulshadeed iyo maslaxaddaas bani-aadannimo isagoo tilmaamaya wuxuu yiri:

**{وَاللّهُ جَعَلَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَاجًا وَجَعَلَ لَكُم مِّنْ أَزْوَاجِكُم بَنِينَ وَحَفَدَةً وَرَزَقَكُم مِّنَ الطَّيِّبَاتِ أَفَبِالْبَاطِلِ يُؤْمِنُونَ وَبِنِعْمَتِ اللّهِ هُمْ يَكْفُرُونَ} {سورة النحل: 72}.**

**(Alle wuxuu idiin sameeyay xaasas idinku nooc ah, xaasaskiinnana wuxuu idinka siiyay ubad iyo farac, wuxuuna idinku galladaystay irsaq wanaagsan, ee ma waxay rumaynaan been abuur** "Ilaahyo aan jirin"**, nicmadii Allena miyay ku gaaloobayaan**) (An-Naxal: 72).

**<u>Ujeeddooyinka Ubad dhalista:</u>**

Ubad dhalistu waxay leedahay afar ujeeddo oo kala ah:

- Inaad ku doontid raallinimada Rabbi, maadaama aad gacan ka geysanaysid sidii ay tafiirta Aadanuhu usii socon lahayd.
- Inaad ku doontid raallinimada Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)*, kol haddaad siduu tira badnida ummaddiisa maalinta Aakhiro ummadaha kale ugula tartami lahaa ku kaalmaynaysid.
- In Eebbe ku siiyo ubad khayr qaba oo kolka aad dhimatid kuu soo duceeya.
- Inaad ku doontid shafeeco kolka ilmo yari kuu saqiiro.

Diinta Islaamku way la dagaallantay baaderinimada (guurka oo laga caago), sababtoo ah baaderinnimadu waxay kahor

---

[1] ***Bukhaari** (1905, 5065, 5066), **Muslim** (1400/1), **Abuu-Daa'uud** (2046).*

[2] ***Abuu-Daa'uud** (2050), **Nasaa'i** (3227), **Ibnu-Xibbaan** (4045).*

imaanaysaa abuurka qofka Aadanaha ah, rabitaankiisa iyo dareenkiisa intaba. Sidaas darteed diinta Islaamku u oggolaan mayso qofka muslinka ahi inuu guur ka caago, isagoo uga jeeda inuu qof Alle caabbudis u go'ay noqdo, gaar ahaan hadduu qofka caynkaas ahi guur awoodi karayo.

Sacad ibnu Abii-Waqaas *(RC)* wuxuu yiri: (Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* Cismaan ibnu Madhcuun ayuu baaderinimo ka celiyay hadduu u oggolaan lahaana waynu is wada kormin (dhufaani) lahayn)[1].

Aanas ibnu Maalik *(RC)* waxa laga weriyay: "Koox saddex nin ka kooban baa tagtay Aqalladii Xaasaska Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* iyagoo sida uu Alle u caabbudo ka waraysanaya. Kolkay uga sheekeeyeen bay "cibaadadiisa" yaraysteen. Markaas bay dheheen: (Annaga iyo isaga "Nabiga" maxaa isaga kaaya dan ah Alle ayaaba dembigiisa mid hore iyo mid dambe intaba u dhaafay eh). Mid baa markaas yiri: (Anigu habeenkii oo dhan baan tukanayaa). Mid kale wuxu yiri: (Anigu weligayba waan soomanaanayaa mana afurayo). Kii kale baa isna yiri: (Anigu dumar waan ka caagayaa oo weligay guursan maayo). Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ayaa markaas intuu "nimankii" u yimid, ku yiri: **(Ma adinkaa sidaas iyo sidaas yiri?. Ilaah baan ku dhaartaye anigaa idiinku Alle-ka-cabsi badan, idiinkuna dhowrsanaan badan, ha yeeshee waan soomaa waanan afuraa, waan tukadaa waanan seexdaa, dumarkana waan guursadaa, ee qofkii sunnadayda ka leexdaa igamid ma aha)**[2].

[1] ***Bukhaari*** *(5073, 4074),* ***Muslim*** *(1402),* ***Ibnu-Xibbaan*** *(1848).*

[2] ***Bukhaari*** *(5063),* ***Muslim*** *(1401/5). Ereyadii Bukhaari.*

### 3- Dhawrista Abtirsiimada iyo Qaraabo xiriirinta:

Cabdullaahi ibnu Camr ibnul-Caas *(RC)* wuxuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Abtirsiimadiinna ka barta qaddar aad qaraabadiinna ku xiriirisaan)**[3].

Kolka guur dhoco ayuu qoys dhismaa, kolka uu qoys dhismo bayna bulsho dhisantaa, abtirsiimana la bartaa.

Abtirsiimo barashadu milanka iyo maldahaadda ayay bulshada ka dhawrtaa. Waxa kaloo lagu xiriiriyaa qaraabada, laguna gacan qabtaa xigtada, sidaas bayna bulshadu ku xoogaysataa, iskuna gargaartaa, iskuna kaashataa.

Guurka Alle jideeyay waxa weeye ka ay sababtiisa ubadku ugu abtirsadaan uguna faanaan aabbeyaashood, taasi oo Aadanaha xag degganaan nafsiyadeed iyo xag gobannimo intaba ahmiyad weyn ugu leh. Haddii aanu guur jirin bulshadu waxay la liici lahayd ubad aan karaamo iyo dadnimo lahayn, cid ay ku abtirsadaanna la arag, taasi oo markaas dhantaalaysa dhaqanka iyo anshaxa wanaagsan, baahinaysana akhlaaq xumida iyo dullinimada.

### 4- Ilaalinta isku duubnida Bulshada:

قَالَ اللهُ تَعَالَى: {**وَمِنْ آيَاتِهِ أَنْ خَلَقَ لَكُم مِّنْ أَنفُسِكُمْ أَزْوَاجًا لِّتَسْكُنُوا إِلَيْهَا وَجَعَلَ بَيْنَكُم مَّوَدَّةً وَرَحْمَةً إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَآيَاتٍ لِّقَوْمٍ يَتَفَكَّرُونَ**} {سورة الروم:**21**}.

**(Calaamadihiisa** "awooddiisa iyo inu keligiis in la caabbudo mudan yahay tusinaya" **waxaa kamid ah inuu naftiinna xaasas idiinka abuuray saad ugu degtaan, wuxuna idin dhex dhigay kalgacaltooyo iyo naxariis,**

[3] ***Tirmidi*** *(1979).*

**dhab ahaantii taasi waxay calaamado** "lagu waana qaato" **u tahay qolo fekeraysa)** (Ar-Ruum: 21).

Cabdullaahi Ibnu-Cumar *(RC)* waxa laga weriyay inuu yiri: Waxaan maqlay Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* oo leh: **(Ninku wuxu mas'uul ka yahay reerkiisa, waana la weydiinayaa wixii loo dhiibay. Naagtu waxay mas'uul ka tahay aqalka ninkeeda iyo ubadkiisa, waana la weydiinayaa wixii loo dhiibay)[1].**

Guurka waxaa ku adkaada, kuna xididdaysta isjacaylka iyo isu naxariisashada labada is-guursaday, qaraabada, ubadka iyo guud ahaan Bulshada.

Labada qofe qoyska wada dhistay waxay iska kaashadaan dhismaha qoyskooda iyo barbaarinta ubadkooda, iyagoo barbaarintaas saldhig uga dhigaya diinta Islaamka. Labada qof way is dhammays-tiraan, mid walibana wuxu hawsha ka qabtaa halka kaga aaddan, taas oo ku xiran hadba takhasuskiisa iyo kartidiisa jireed.

Haweenaydu waxay qabataa hawlaha ay takhasuska u leedahay iyo shaqooyinka samayskeeda dumarnimo waafaqsan sida; maaraynta guriga, barbaarinta ubadka, iwm. Waxay qoyska u diyaarisaa raashin bisil, biyo qaboow iyo dhar nadiif ah.

Ninku isagu wuxuu qabtaa hawlaha u gaarka ahe ragannimadiisa waafaqsan sida; mas'uuliyadda guud ee qoyska, qabashada shaqooyinka culculus iyo xag dhaqaale ka daryeelka qoyska.

Nafta ood ku jara-bartid qaadista mas'uuliyadda reerka, daryeelkiisa, gudashada waajibka kaa saaran xaaskaaga, dabeecaddeeda ood ugu samirtid, dhib wixii kaaga yimaada ood u dulqaadatid, hanuuninteeda ood u hawlgashid, dadaal aad u gashid sidaad marasho iyo masruuf xalaal ah ugu keeni lahayd, carruurta ood waddada toosan ku barbaarisid, iwm. Arrimahaas oo dhami ujeeddooyinka guurka ayay kamid yihiin, tiiyoo weliba ajar iyo xasanaad Eebbe kaa siinayo.

Ninku kolka uu fiidkii isagoo daallan shaqo ka yimaado, uuna ehelkiisa iyo ubadkiisa aqalka kula kulmo, wuxuu halkaas ku illaawaa wixii maalinkaas dhib soo qabsaday, waxana uga baaba'a daalkii wareerka adduunyada iyo irsaq raadinta kasoo qabsaday. Haweenayda oo iyana maalintaas oo dhan hawl adduunyo iyo aqal agaasimid ku jirtay, kolka ay saygeeda fiidkii la kulanto, gacma furanna kusoo dhowayso, daalkii iyo iska daba wareeggii halkaas bay uga haraan. Sidaas buu mid waliba kan kale hooskiisa raaxa guur iyo degganaan nafsiyadeed uga helaa.

Ninka oo ka xorooba agaasinka guriga sida; hagaajintiisa, cunto karinta iyo diyaarinta, alaab dhaqista, suuq kasoo adeegga, iwm., waxay siisaa waqti dheeraad ah oo uu ku shaqaysto, wax ku barto, Eebbena ku caabudo.

Thowbaan *(RC)* wuxuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Midkiin ha yeesho qalbi Eebbe ku mahadin og, carrab Eebbe xusid badan iyo haweenay mu'minad suubban ahoo Aakhiradiisa ku kaalmaysa)[2].**

Haddaba dumarka in dunida lagula raaxaysto, carruurna laga daadiyo oo qura

[1] ***Bukhaari*** *(893, 5188),* ***Muslim*** *(1829/20).*

[2] ***Tirmidi*** *(3094),* ***Ibnu-Maaja*** *(1856).*

looma guursado, balse yoolka ugu muhiimsani waxa weeye inay ninka u abuuraan waqti iyo jawi uu Eebbe ku caabbudo, danihiisa gaarka ahna ku qabsado.

**5- Dhufays Shaydaan laga galo:**

Ibnu-Mascuud *(RC)* wuxuu Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyey inu yiri: **(Dhallinyarooy, kiinnii guur awoodi karaa ha guursado maxaa yeelay guurku aragga waa u dabool ibtana waa u dhufays, kaan awoodina ha soomo, soonkaa shahwada ka jebinayee)[1].**

Guurku waxa uu kaa oodaa meelihii uu Shaydaanku kaasoo gelayey, mar hadday wuxuu xaaraan ku raadi ku lahaa iyagoo xalaal ah rugtaada kuu yaallaan. Qofku haddaanu Alle-ka-cabsi iyo iimaan ku hubaysnayn, rabitaankiisa ayaa hor kaca, haddii markaas aanu guur xalaal ah helin, siduu dembi isaga ilaaliyaa way adag tahay.

## 2- XULASHADA GACALKA

Dinteenna Islaamku waxay labada guur-doonka ah hor dhigtay xeerar iyo qawaaniin, hadday u hoggaansamaan guurkoodu uu mid ay is-faham iyo is-jacayl taya lihi ka dhashaan noqonayo. Qoysku wuxuu markaas soo saarayaa ubad xag caqli iyo xag jir ka fayoow, diintiisa iyo dadkiisana anfacaya.

Xeerarkaas kuwa ugu mudan haddaynu soo qaadanno:

**1- Qof Diin leh xulo:**

Erayga "Diin" waxa loola jeedaa fahamka dhabta ah ee Islaamka iyo ku dhaqankiisa toosan. Waxa kaloo loola jeedaa u hoggaansamid guud uu qofku u hoggaansamo shareecada Islaamka iyo xeerarkeeda, goor kasta iyo goob kasta oo uu joogo.

Abuu-Hurayra *(RC)* wuxu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Naag afar baa loo guursadaa; maalkeeda, quruxdeeda, sharafteeda iyo diinteeda, ee tan diinta leh gaar gacmaha ciid gashee)[2].**

Gabadha diinta lihi waa tan garanaysa siday u gudan lahayd xaqa uu ninkeedu ku leeyahay, siday u dhawri lahayd asraarta gurigeeda iyo nafteeda, siday isaga ilaalin lahayd masayr, carruurtana ugu barbaarin lahayd tubta (jidka) toosan.

Cabdullaahi Ibnu Cumar *(RC)* wuxuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay inuu yiri: **(Adduunyadu waa raaxo gaaban, adduunyada raaxadeedana marwo suubban[3] baa ugu fiican)[4].**

Haddaynu u bayrno xagga Xulashada ninka, diinteenna Islaamku waxa ay goysay laba qodob oo haddii ninka laga helo ay tahay in markaas inanta uu soo doontay loo guuriyo, labadaas qodob oo kala ah; Diin iyo dabeecad.

Abuu-Hurayra *(RC)* wuxu Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Hadduu nin aad diintiisa iyo dabeecaddiisa u bogtaan idinka soo doonto** "gabar"**, u guuriya, haddaydaan yeelinna xumaan iyo fasahaad weyn baa dhulka ka dhacaya)[5].**

[1] ***Bukhaari** (1905, 5065, 5066), **Muslim** (1400/1).*

[2] ***Bukhaari** (5090), **Muslim** (1466/53), **Abuu-Daa'uud** (2047).*

[3] ***Suubban**: Rabbigeed adeecda, ninkeedana raalliyo u ah..*

[4] ***Muslim** (1467).*

[5] ***Tirmidi** (1084), **Ibnu-Maaja** (1967).*

Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* kama aanu hadlin qurux iyo maal toona ragga guurdoonka ah looga baahan yahay. Sababtu waxa weeye ninka ragga ah waxa qurux ugu filan ragannimadiisa, kol hadduu waxgarad yahay, Alle caabbud yahay, caqli iyo kartina leeyahay.

Dhanka kale, marka diinta Islaamka laga hadlayo, maalku kamid ma aha qodobbada guurdoonka lagu xiray. Maxaa yeelay ninkii diin (aqoon iyo ku dhaqan) iyo dabeecad wanaag isku darsada, Eebbe isagaa xagga maalka ka dammaanad qaaday. Waxa taasi marqaati ka ah Aayadda oranaysa:

**{إِن يَكُونُوا فُقَرَاء يُغْنِهِمُ اللَّهُ مِن فَضْلِهِ} {سورة النّور:32}.** **(Hadday sabool yihiin Alle isagaa deeqdiisa ku hodminaya)** (An-Nuur: 32).

Abuu-Hurayra *(RC)* wuxuu Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Saddex Alle inuu gargaaraa xaq bay ku tahay: Guur-doonka dhawrsanaanta doonaya, qofka madax furashada loo haysto oo inuu isfurto doonaya iyo qofka jidka Alle ku jihaadaya)[1].**

Waxa haddaba loo baahan yahay inantaada iyo walaashaa inaad u doortid nin diin iyo akhlaaq leh kuna dhaqmaya waxyaabaha ay diintu farayso, kana fogaanaya waxyaabaha ay ka reebayso.

Ma dhib ka weyn baa jira in gabar dhowrsani ay ku dhacdo guurka nin aan diin aqoon, kuna dhaqmin oo fisqiga iyo faajirnimada iska dhex dabaasha.

Waxaa la yiri nin baa nin kale weydiiyey: (War heedhe inan baa ii joogtee yaan u guuriyaa?). Saa kii kalaa ugu jawaabay: (Nin daa'inkiis ka biqi og u guuri, maxaa yeelay hadday deeqdana asagaa daryeeli og hadday ka daadegi weydana ugu yaraan ma uu dulmin doono)[2].

Waxa kaloo la yiri: Nin dadkii hore ee suusuubbanaa kamid ah baa inuu inantiisa guuriyo doonay. Markaas buu nin ay deris ahaayeen oo Majuusi "dab-caabbud" ahaa la tashi ugu tegey. Dab caabudkii oo yaabban baa yiri: (Adduun iyo Aakhiraba dadku adigay kaa waraystaane maxaad aniga iweydiinaysaa oon kugu war dhaamaa?). Ninkii muslinka ahaa baa markaas yiri: (Iska daaye, ila taliyoo yaan inantayda siiyaa?). Dab caabudkii baa markaas wuxu yiri: (Madaxweyneheennii Kisra xooluu dooran jiray, madaxweynihii Ruum ee Qaysar qurux buu dooran jiray, Carabi nasab iyo qabiil bay dooran jirtay, madaxweynihiinnii Maxamedna diin buu dooran jiraye, bal adigu ciddaad ku dayan lahayd go'aan ka gaar)[3].

**2- Qoys Sharaf leh ka xulo:**

Waxaa loo baahan yahay in dad la garanayo oo sharaf iyo dhawrsanaan leh laga guursado. Waa tay Caa'isha *(RC)* Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka werisay: **(Xawadiinna u doorta, kuwa geeyana guursada una guuriya)[4]**.

Xadiithka micnihiisu waxa weeye qofka aad guursanaysaan amaba u guurinaysaan hubiya inuu yahay gayaan qoys wanaagsan oo sharaf iyo sumcad leh ka dhashay, bay'ad wanaagsanna kusoo barbaaray.

Cumar ibnul Khadhaab *(RC)* kolkii la weydiiyay xaqa uu inanku aabbihiis ku

[1] ***Nasaa'i*** *(3218),* ***Axmed*** *(7410),* ***Ibnu-Maaja*** *(2518),* ***Tirmidi*** *(1655).*

[2] *Sabriye Muuse (Raaxada Guurka:8 ).*

[3] *Sabriye Muuse (Raaxada Guurka: 8).*

[4] ***Ibnu-Maaja*** *(1968).*

leeyahay, wuxuu yiri: (Inuu hooyadiis u xulo, magac fiican u bixiyo, Qur'aanka baro)[1].

**3- Dad kore ka xulo:**

Talooyinka wax-ku-oolka ah ee Islaamka kuna saabsan xulashada qofka la guursanayo waxaa kamid ah in dumarka dhalasho ahaan fogfog laga doorbido kuwa qaraabada sokeeye, iyadoo looga dan leeyahay laba arrimood: **1-** Inuu ka dhasho ubad dhanka caqliga iyo jirka labadaba ka fayoow, cudurrada la'iska dhaxlana ka dheeri. **2-** In ay qabaa'ilka kala duwani guurka caynkaas ah xidid iyo xigto ku noqdaan, sidaasna xiriirka bulshadu ku xoogaysto.

**4- Gabar xulo:**

Xeerarka kale ee ay diinteenna Islaamku jeexday waxa kamid ah in Gabadha[2] guursigeeda Garoob[3] guursigeed laga hormariyo. Xikmadda arrintaas ku jirtaa waxa weeye in qoyska laga ilaaliyo wax kasta oo qalaanqal ka dhex abuuri kara, lana adkeeyo xiriirka is-jacayl ee kutirsaneyaasha qoyskaas. Maxaa yeelay gabadhu waxay jeclaataa, barataa, lana qabsataa qofka ugu horreeya ee guursada, halka laga yaabo in haweenayda garoobka ah, ama laga geeriyooday aanay ninka labaad ka helin jacaylkii iyo wanaaggii ay filaysay, kala duwanaanta dabeecadda iyo dadnimada labada nin ee guursaday awgeed.

Cutba ibnu Cuwaym Al-Ansaari wuxuu Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay inuu yiri: **(Gabdhaha guursada iyagaa af macaan oo uur saafiya leh, in yarna ku qanci oge)[4].**

Curwa *(RC)* wuxuu aabbihiis ka weriyay inay Sayida Caa'isha *(RC)* Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ku tiri: (Rasuul Alloow haddaad dooxo dhir la daaqay iyo dhir aan la daaqini ku taal degto, teed Awrkaaga ku deysan lahayd?). Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxuu yiri: **(Ta aan la daaqin).** Waxay tiri: (Taasi waa aniga)[5].

Ereygaas waxay ka wadday baa la yiri inay caddayso siday xaasaska kale ee Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* uga wanaagsan tahay maadaama gabar aan iyada ahayn guursan.

Arrinka oo sidaas ah, bay misana in garoob la guursadaa mararka qaar gabdha guursiga ka habboon tahay.

Jaabbir ibnu Cabdillaahi *(RC)* waxa laga weriyay inu Nabigu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ku yiri: **(Jaabbiroow ma guursatay?.** Waxan iri: (Haa Rasuul Alloow). Wuxuu yiri: **(Ma garoob baa mise waa gabar?).** Waxan iri: (Mayee waa garoob). Wuxu yiri: **(Gabar maxaad u guursan weyday aad la ciyaarto oo kula ciyaarta?).** Waxan iri: (Rasuul Alloow aabbahay wuxuu geeriyooday maalintii Uxud toddoba gabdhood buuna inooga tegay, marka waxaan guursaday haweenay madaxyadooda kulmisa, una adeegta). Wuxuu yiri: **(Waad haleeshay** "sidii qunnayd"**)[6].**

Guurka caynkaas ahi wuxuu noqonayaa mid korinta agoonta iyo daryeelkooda la'iskaga kaashado, halka hadduu gabar

---

[1] ***Calwaan*** *(Tarbiyatul-Awlaad fil-Islaam: 1/33).*
[2] ***Gabar****: Inan aan weli la guursan.*
[3] ***Garoob****: Haweenay guur soo martay..*
[4] ***Ibnu-Maaja*** *(1861).*
[5] ***Bukhaari*** *(5077).*
[6] ***Bukhaari*** *(2097),* ***Muslim*** *(715).*

guursan lahaa laga yaabi lahaa inay aqoon yari iyo adkaysi darri awgood u awoodi weyn lahayd korinta agoonta iyo intii kale ee ay iyadu dib ka dhasho.

### 5- Gacal dhalaya xulo:

Talooyinka Islaamka kuna saabsan Xulashada xaaska waxa kamid ah in haweenay dhalaysa la guursado. Haweenaydu inay dhalayso waxa lagu gartaa laba arrimood: 1- Jirkeeda oo ka nabdoon cudurrada uurka hor istaaga, arrintaas oo ogaalkeeda dhakhaatiirta ku shaqada leh lagala tashado. 2- In la eego xaaladaha hooyadeed iyo haweenka walaaleheed ahe la qabo. Hadday nooca ubad dhalka badan yihiin, aalaaba iyana waa lamid Insha'allaah.

Macqil ibnu Yasaar waxa laga weriyay: Nin baa Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* intuu u yimid, ku yiri: (Rasuul Alloow waxaan jeclahay islaan wanaagsan oo qurux badan, hase yeeshee aan dhalayn ee ma guursadaa?). Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxuu yiri **(Maya)**. Dabadeed mar labaad buu u yimid wuuna u diiday. Mar saddexaad markuu u yimid buu Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxuu yiri: **(Guursada mid ninkeeda jecel oo ubad dhalid badan, tira badnidiinnaan ummadaha kula tartamayaaye)[1].**

Haddaba, qofka muslinka ah waxa laga doonayaa inuu doondoono haweenay u dhasha ubad uu ummadda Nabi Maxamed *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ku badiyo. Ninka haweenay ubad u dhasha guursanayaa waa inuu ku talagalaa qaadista mas'uuliyadda kaga

[1] ***Abuu-Daa'uud** (2050), **Nasaa'i** (3227), **Ibnu-Xibbaan** (4045).*

aaddan ubadkiisa hadday ahaan lahayd quudin, barbaarin iyo waxbarid intaba.

Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* waxa laga weriyay inu yiri: **(Alle wuxuu mas'uul kasta weydiiyaa wixii uu u dhiibay ma dhowray mise wuu dayacay, ilaa uu ninka ka weydiiyo qoyskiisa)[2].**

## 3- UBAD JACAYLKA IYO NAXARIISTA

Allaha sarreeyaa uu ubadka mar ku tilmaamay inay quruxda nolosha adduunyada yihiin, isagoo leh:

**{الْمَالُ وَالْبَنُونَ زِينَةُ الْحَيَاةِ الدُّنْيَا} {سورة الكهف: 46}.**
**(Maalka iyo carruurtu waa quruxda nolosha adduunyada)** (Al-kahaf: 46).

Mar inay deeq weyn oo in Alle loogu mahad celiyo mudan yihiin:

**{وَأَمْدَدْنَاكُم بِأَمْوَالٍ وَبَنِينَ وَجَعَلْنَاكُمْ أَكْثَرَ نَفِيرًا} {سورة الاسراء: 6}.**
**(Waxaan idiinku deeqnay maal iyo wiilal waxaanan idinka dhignay kuwa ugu ciidamo iyo xoog badan)** (Al-Israa': 6).

Mar saddexaad, hadday dariiqii xaqa ahaa qaadaan dadka Alle ka baqayana ku daysadaan kuway indhuhu ku doogsadaan yihiin:

**{وَالَّذِينَ يَقُولُونَ رَبَّنَا هَبْ لَنَا مِنْ أَزْوَاجِنَا وَذُرِّيَّاتِنَا قُرَّةَ أَعْيُنٍ وَاجْعَلْنَا لِلْمُتَّقِينَ إِمَامًا} {سورة الفرقان: 74}.**
**(Kuwa dhahaya: Rabbigeenow naga sii dumarkeenna iyo ubadkeenna qaar ay indheheennu ku qabawsadaan, kuwa Alle ka baqayana hoggaamiyeyaal inooga dhig)** (Al-Furqaan: 74).

[2] ***Ibnu-Xibbaan** (4476).*

Waxa la wada garanayaa in qof kasta oo waalid ah qalbigiisu ubadka uu dhalay ama ka uurka lagu sido uu aad u jecelyahay. Jacaylka ubadka, daryeelkooda iyo u naxariisashadoodu waxa weeye dareen ku beeran qofka oo uu Alle ugu deeqay, la'aantiisna dadkuba dunida ay ka dabar go'i lahaayeen.

Sidaas darteed buu waalidku daryeelka ubadkiisa, barbaarintooda, ku dhafriddooda iyo usoo jeedista dantooda ugu sabraa.

Nabigu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* aad buu asxaabtiisa ugu dhiirrigelin jiray uguna tirtirsiin jiray u naxariisashada ubadka iyo akhlaaq wanaagga.

Cabdullaahi ibnu Camr ibnul-Caas *(RC)* wuxuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay inuu yiri: **(Naga mid ma aha qofkaan keenna da'da yar u naxariisan, keenna da'da weynna darajayn)[1].**

Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* waxa kaloo laga weriyay inu yiri: **(Qofkaan keenna yar u naxariisan, keenna weynna xaqiisa "qaddarkiisa" garani inaga mid ma aha)[2].**

Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* qof asxaabtiisa kamid ahoon carruurtiisa u naxariisanayn hadduu arko, si adag buu u canaanan jiray, inu qoyskiisa iyo ubadkiisa u wanaagsanaadana ugu waanin jiray.

Ummul-Mu'miniin Caa'isha *(RC)* waxaa laga weriyay: (Nin reer miyi ah baa intuu Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* u yimid, ku yiri: (Carruurtiinna miyaad dhunkataan, annagu ma dhunkannee?). Nabigu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxu markaas ku yiri: **(Maxaan kuugu aal hadduu Eebbe qalbigaaga naxariistii ka siibay?)[3].**

Abuu-Hurayra *(RC)* waxa laga weriyay: (Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ayaa Xasan ibnu Cali dhunkaday iyadoo Aqrac ibnu Xaabis Al-Tamiimi uu goobta fadhiyo. Aqrac wuxuu yiri: (Toban wiil baan leeyahay midkoodna "weligay" ma aanan dhunkan). Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ayaa markaas intuu "Aqrac" eegay yiri: **(Qofkaan naxariisan looma naxariisto)[4].**

Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* kolka uu Salaadda tukanayo, hadduu ilma yari ooyo, salaadda wuu dedejin jiray, si aanay ilmahaas hooyadiis oo salaadda kula jirtaa uga welwelin.

Abuu-Hurayra *(RC)* wuxuu Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay: **(Qofkiin hadduu Imaam noqdo, salaadda ha dedejiyo, maxaa yeelay waxa idinku jira ilmo yar, qof da' ah, qof tabar yar, iyo qof jirran, hadduu keligiis tukanayase siduu doono ha u dheereeyo)[5].**

Waxa laga yaabaa in dhallaanku uu qofka weyn la ciyaaro isagoo garka amaba marada uu xiranyahay ka jiidaya. Haddaba markaas oo kale ma aha in ubadka la hiifo oo la canaanto, taasi oo dareenkiisa iyo naftiisa dhaawici karta, kuna abuuri karta inuu ilmo xirxiran oon dadka dhex gelin noqdo. Haddiise ciyaartiisa dhoola caddayn iyo ciyaar loogu beddelo, waxa markaasi qalbigiisa gelaya farxad iyo raynrayn, waxanu helayaa

[1] ***Tirmidi*** *(1919).*
[2] ***Abuu-Daa'uud*** *(4943),* ***Tirmidi*** *(1920).*

[3] ***Bukhaari*** *(5998),* ***Muslim*** *(2317/64).*
[4] ***Bukhaari*** *(5997),* ***Muslim*** *(2318/65). Ereyadii Muslim.*
[5] ***Bukhaari*** *(703),* ***Muslim*** *(467).*

geesinimo uu dadka waaweyn ku dhexgalo kagana faaiideysto, aftahanimo iyo dad la dhaqanna kaga kororsado.

Waxa la weriyay Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* labadii wiil ee uu awoowaha u ahaa Xasan iyo Xuseen amaba gabadhii kale ee uu awoowaha u ahaa Umaama ee ay gabadhiisii Zaynab *(RC)* dhashay inuu ximbaari jiray, koolkoolin jiray lana ciyaari jiray.

Abuu-Qataada Al-Ansaari *(RC)* waxaa laga weriyay in Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* uu tukanayay isagoo sida Umaama oo ay dhashay Zynab, gabadhii Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* una dhashay Abul-Caas ibnu Rabiica ibnu Cabdi-Shamsi, oo markuu sujuudayo uu dhigayay markuu istaagayana uu qaadayay[1].

Shaddaad binul-Haadi *(RC)* waxaa laga weriyay inu yiri: (Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ayaa noosoo baxay salaaddii Duhur ama Casir isagoo Xasan ama Xuseen xambaarsan. Markuu salaadda ina gelinayay ayuu dhulka dhigay, markaas buu salaaddii xirtay. Markuu sujuuday buu sujuuddii dheereeyay. Markaas baan madaxa kor u qaaday, mise wiilkii baa Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* oo sujuudsan dhabarka ka saaran, markaas baan sujuuddaydii ku laabtay. Markuu Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* salaadii ka baxay bay dadkii ku dheheen: Rasuul Alloow waxan u malaynay inu dhib dhacay ama laguu waxyoonayo. Wuxuu yiri: **(Waxaas oo dhami ma dhicin, laakiin inankayga ayaa gaadiid iga dhigtay, waxanan diidayay in aan dedejiyo intuu dantiisa ka gudanayo)[2].**

[1] ***Bukhaari*** *(516),* ***Muslim*** *(543/41).*

[2] ***Nasaa'i*** *(1141),* ***Axmed*** *(Musnad: 16129).*

Burayda *(RC)* waxaa laga weriyay: Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* oo khudbaynayaa ayaa waxa yimid Xasan iyo Xuseen oo laba qamiis oo cas cas ooy gashanaayeen ku turaanturroonaya, markaas buu Nabigu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* intuu khudbadii joojiyay oo minbarkii ka degay, soo xambaaray, dabeetana intuu minbarkii kusoo laabtay yiri: **(Alle run buu sheegay markuu yiri: "Xoolihiinna iyo Carruurtiinnu wax kale maahee waa fidno", waxan arkay labadan oo qamiisyadooda ku turaanturroonaya markaas intaan iscelin waayay oon warkii gooyay baan soo qaaday)[3].**

Caa'isha *(RC)* oo markuu Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* guursanayay da' yarayd, markii la guri geynayay alaabadii ay ku ciyaari jirtay ayay hore usii qaadatay[4].

Caa'isha *(RC)* waxa laga weriyay: (Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ayaan gabdho-gabdho ku ag ciyaari jiray, waxanan lahaa gabdho saaxiibbaday ah oo ila ciyaara. Markuu Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* soo galo bay iska qarin jireen "xishood dartiis' wuuna iisoo gelin jiray say iila ciyaaraan)[5].

Caa'isha *(RC)* waxa laga weriyay in (Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* uu kasoo laabtay duullaankii Tabuuk ama Khaybar ayadoo ay kooraha faraskeeda wax ku qarsoon yihiin. Markaas dabayl baa intay timid dabool qaadday waxana soo muuqday gabdho ay Caa'isha ku ciyaari jirtay. Markaas buu yiri: **(Caa'ishaay wa maxay waxani?).** Waxay tiri: Waa gabdhahaygii. Wuxu ku dhex

[3] ***Tirmidi*** *(3774),* ***Nasaa'i*** *(1413),* ***Ibnu-Xibbaan*** *(6007).*

[4] ***Muslim*** *(1422).*

[5] ***Bukhaari*** *(6130).*

arkay Faras laba garbood leh. Wuxuu yiri: **(Waxa iiga dhex muuqdaa waa maxay?).** Waxay tiri: (Waa faras). Wuxuu yiri: **(Waxa dul saaranina waa maxay?).** Waxay tiri: (Waa laba garbood). Wuxuu yiri: **(Ma Faras laba garbood leh baa?).** Waxay tiri: (Miyaadan maqal in Sulaymaan uu lahaa Fardo garba leh). Waxay tiri: (Markaas buu Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* qosol la dhacay ilaa aan gawsihiisa ka arkay)[1].

Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* aad buu carruurta u jeclaa, una qaddarin jiray, uguna oggolaan jiray inay ciyaaraan, sababtoo ah ciyaartu waxay kobcisaa caqliga ubadka iyo maskaxdiisa, waxayna hawl gelisaa xubnihiisa iyo dareenkiisa.

Ciyaartu waxa weeye diyaargaroow dabiici ah oo carruurtu ay ku dhashaan, si ay isaga saaraan tamarta dheeriga ah ee jirkooda ku jirta. Ubadku waxa uu ciyaarta ku bartaa wax kasta oo hareerihiisa ahi waxa ay ka samaysan yihiin. Wuxuu ciyaarta ku bartaa siduu u xakamayn lahaa naftiisa, waxana ku kordha kalsoonida uu isku qabo iyo kobcinta karaankiisa waxqabad.

Waxa loo baahan yahay in ubadka loo oggolaado inu waqti uu ku ciyaaro helo, gaar ahaan kolka uu waajibka waxbarasho kasoo baxo, kutubtii iyo buugaagtii looga baahnaa akhriyo, salaadihii iyo cibaadooyinkii Eebbena guto. Ubadka haddii ciyaarta loo diido oo wax akhris iyo qaylo nafta looga qaado, maskaxdiisa ayaa daalaysa, caqligiisu isdhimayaa, murugana ku dhalanaysaa. Ubadka caafimaadka qabaa dhaqaaq la'aan shan daqiiqo ma fadhiyi karo. Waxaad durbaba arkaysaa isagoo meel eegaya, waxay ishiisu qabato soo qaadanaya, gedgeddinaya, afka gelinaya, una furaya suu waxa ku dhexjira u fiiriyo.

[1] ***Abuu-Daa'uud** (4932).*

## 4- GABDHO NACAYBKA IYO WIILAL JACAYLKA

قَـالَ اللّٰه تَـعَـالَـى: **{وَإِذَا بُشِّرَ أَحَدُهُمْ بِالأُنثَى ظَلَّ وَجْهُهُ مُسْوَدًّا وَهُوَ كَظِيمٌ 58 يَتَوَارَى مِنَ الْقَوْمِ مِن سُوءِ مَا بُشِّرَ بِهِ أَيُمْسِكُهُ عَلَى هُونٍ أَمْ يَدُسُّهُ فِي التُّرَابِ أَلاَ سَاء مَا يَحْكُمُونَ} {سورة النحل: 58-59}.**

**(Haddii midkood gabar** "u dhalatay" **loogu bishaareeyo wejigiisu madoow ayuu noqdaa asagoo ka xun. Dadka ayuu ka dhuuntaa waxa loogu bishaareeyay** "xumaantooda" **darteed,** "kuna fekeraa" **ma dullinimuu ku haystaa mise ciidda ayuu ku duugaa. War heedhe dadku go'aan xumaa)** (An-Naxal: 58-59).

Carruurtu guud ahaan iyagoo naxariis iyo nimco Alle cidduu doono ugu deeqo ah, misana waxaa jirta bulshada muslinka ah inay waalidka qaar gabdhaha ku eegaan il gaar ahoo ka geddisan ta ay wiilasha ku eegaan, taas oo ah dhaqan bulshadeed salka ku haya dhaqankii jaahiliga ahaaye diinta Islaamku duugtay.

Waalidku ubadka inuu kala jeclaado waxa keenaya iimaanka oo daciif ah iyo kalsoonida wixii Alle kuu qoray lagu qabo oo liidata. Dadka caynkaas ahe qoraalkaas Alle qoray aan ku qanacsanayn miyaanay maqal waxa uu Eebbe ka yiri taladiisa go,an, amarkiisa fula iyo awooddiisa aanay cid hor istaagi kartaa jirin, kuna saabsan arrinta gabdhaha iyo wiilasha, isagoo leh:

**{لِلَّهِ مُلْكُ السَّمَاوَاتِ وَالأَرْضِ يَخْلُقُ مَا يَشَاء يَهَبُ لِمَنْ يَشَاء إِنَاثًا وَيَهَبُ لِمَن يَشَاء الذُّكُورَ 49 أَوْ يُزَوِّجُهُمْ ذُكْرَانًا وَإِنَاثًا وَيَجْعَلُ مَن يَشَاء عَقِيمًا إِنَّهُ عَلِيمٌ قَدِيرٌ} {سورة الشورى: 49-50}.**

**(Ilaah baa iska leh lahaanshaha cirka iyo dhulka, wuxuu doono ayuu abuuraa, qofkuu doono gabdho ayuu ugu deeqaa qofkuu doonana wiilal. Ama wuxuu isugu dhafaa wiilal iyo gabdho, qofkuu doonana madhalays buu ka dhigaa, isagaana ogaal iyo awood badan)** (Al-Shuuraa: 49-50).

Haddaba, Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* si uu caadadaas jaahiliga ah u dabar gooyo wuxu si gaar ah uga dardaarmay, in gabdhaha la dhaqaaleeyo, la daryeelo, barbaarintoodana la wanaajiyo si Janno loogu mutaysto.

Caa'isha *(RC)* waxay Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka werisay inuu yiri: **(Qofkii wax gabdhahaan kamid ah lagu ibtileeyo oo markaas koriya korintoodana wanaajiya oo edbiya edebtoodana wanaajiya, gabbaad bay Naarta uga noqdaan)[1].**

Cuqba ibnu Caamir Al-Juhani *(RC)* waxaa laga weriyay inuu yiri: Waxaan maqlay Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* oo leh: **(Qofkii saddex gabdhood leh oo intuu ku sabro, xoolihiisa ka quudiya, ka waraabiya, kana arrad tira, Naarta ayay maalinta Qiyaamo gabbaad uga noqdaan)[2].**

Aanas ibnu Maalik *(RC)* waxaa laga weriyay: Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxu yiri: **(Ruuxii laba gabdhood koriya ilaa ay ka qaan-gaaraan, maalinta Qiyaamo wuxuu yimaadaa aniga iyo isaga oo sidaas ah** "inta uu labadiisa farood isku nabay"***)*[3].**

[1] ***Bukhaari** (1418, 5995), **Muslim** (2629). Ereyadii Muslim.*
[2] ***Axmed** (17538), **Ibnu-Maaja** (3669).*
[3] ***Muslim** (2631), **Tirmidi** (1914).*

Haddaba, ubad barbaariyuhu waa inuu talooyinkaas Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* iyo farriimahaas diinta Islaamku ay farayso kuna saabsan simidda ubadka iyo daryeelka gabdhaha qaato.

## 5- KA SABARKA UBADKA SAQIIRA

Abuu-Hurayra *(RC)* wuxuu Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ka weriyay inuu yiri: **(Qofkii Muslimiinta kamid ah ooy saddex carruur ahi u saqiiraan Naar geli maayo dhaar-fur[4] mooyee)[5].**

Waxa la wada ogsoon yahay in qofka Aadanaha ah noloshiisa waxa ugu qaalisani ay yihiin ubadka uu dhalay ee dhiiggiisa iyo hilibkiisa kasoo go'ay. Haddaba ubadkii oo la dhawrayay inu soo barbaaro, hana qaado, wax barto, mustaqbal gaaro, guri yagleelo, dadkiisa iyo diintiisana anfaco, hadduu isagoo da' yar mawdku dafo, imtixaan waalidkiis uga weyn oo dunida lagu marsiin lahaa ma jiro.

Haddaba qofka muslinka ahi kolka uu iimaan heer sare ka gaaro, qoraalka Alle shar iyo khayr kuu yahayna garowsado, dhacdooyinka oo dhami dhaayihiisa way la fududaadaan, dhibaatoo dhamina way la dhuubataa, Alle ayuuna isu dhiibaa kana hoos galaa wax kasta oo laga baqdo iyo balaayo kasta oo kaan Alle ka baqin beerka goysa. Markaas buu damiirkiisu nastaa, niyaddiisu degtaa, qoraal kasta oo xag Alle kaga yimaadana ku sabraa, kuna raalli noqdaa.

[4] ***Dhaar-fur:** Dhaartii uu Eebbe Suurat Maryam, Aayaddeeda 71aad ku dhaartay cid kastaa inay Jahannamo Buundada "Siraadka" ka dul taagan mari doonto.*
[5] ***Bukhaari** (6656), **Muslim** (2632/150), **Tirmidi** (1060).*

Iyadoo haddaba iimaankaas laga duulayo, ayuu Suubbanuhu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxu sheegay qofkii ay carruur laba iyo wixii ka badan ahe aan qaangaarin, wiilal ha ahaadeen ama gabdho amaba isku dhaf eh, u saqiiraan, oo markaas sabra, Alle agtiis iyo inuu ajar ka helayana ku xisaabsada, inuu Eebbe Naar ka xijaabayo, carruurtaas yaryare u saqiirtay dartoodna ugu naxariisanayo.

Suubbanaha *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wiilkiisii Ibraahim *(RC)* markuu dhintay, aad buu u murugooday, indhihiisuna way ilmeeyeen, wuxuuna yiri: **(Ishu way ilmaynaysaa, qalbiguna wuu murugaysan yahay, wax Alle raalli ka yahay mooyee wax kalena dhihi mayno, annaguna Ibraahimoow tegistaada waynu la murugaysan nahay)[1].**

Abuu-Saciid Al-Khudri *(RC)* waxaa laga weriyay Nabigu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* dumar uu wax barayay inu ku yiri: **(Haweentii idinka mid ahoo ay saddex ubad ahi u saqiiraan, Naarta ayay gaashaan uga noqonayaan).** Haweenay baa tiri: Labana?. Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxu yiri: **(Labana)[2].**

Aanas ibnu Maalik *(RC)* waxaa laga weriyay: (Abuu-Dhalxa *(RC)* wiil uu dhalay baa jirranaa. Mar uu "Abuu-Dhalxa" dibadda u baxay buu wiilkii dhintay. Kolkuu soo laabtay buu yiri: (Wiilkii see yahay?). Ummu-Sulaym *(RC)* "Wiilka hooyadiis" baa tiri: (Naftiisii way degtay, waxanan rajaynayaa inu nastay[3]). Cashadii bay markaas u keentay, wuuna casheeyay. Keddib, si aanay weligeed hore isugu qurxin bay isu qurxisay. Markaas buu u galmooday. Ummu-Sulaym Kolkay aragtay inuu dhergay una galmooday, bay ku tiri: (Abaa-Dhalxoow hadday qolo reer aqal deggan amaano u dhiibtaan, dabadeedna amaanadoodii weydiistaan miyay u diidi karaan?). Wuxuu yiri: (Maya). Waxay tiri: (Wiilkaagii Alle agtiisa ku xisaabso "Wuu dhintaye Alle Ajar weydiiso"). Wuxu yiri: Markaas buu intuu carooday oo yiri: (Intaad faraha iga qaadday ilaa aan is dhaamay "Janaabo igu dhacday" baad keddib wiilkaygii warkiisa ii sheegtay miyaa), ayuu dhaqaajiyay Rasuulkana *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* u tegay, wixii dhacayna uga sheekeeyay. Rasuulku *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* wuxu yiri: **(Habeenkiinna Alle ha idiin barakeeyo)**.

Werin kale waxay leedahay: **(Alloow u barakee).**

Abuu-Dhalxa waxay u dhashay wiil uu Nabigu *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* intuu u dhanxanageeyay uu Cabdullaahi u bixiyay)[4].

Nin asxaabta Nabiga *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* kamid ahaa wuxuu yiri: (Waxaan arkay sagaal wiil "Cabdullaahi dhalay" oo wada xaafidu Qur'aan ah, waana ducadii Rasuulka *(Sallal-Laahu calayhi wa-Sallam)* ee ahayd: **"Alloow u barakee"** oo Alle u aqbalay darteed).

[1] ***Bukhaari*** *(1303),* ***Muslim*** *(2315).*

[2] ***Bukhaari*** *(101, 1249),* ***Muslim*** *(2634/153),* ***Axmed*** *(Musnad:11315).*

[3] *Waxay ka wadday wuu geeriyooday, isna wuxuu u qaatay wuu ladnaaday.*

[4] ***Bukhaari*** *(1301, 5470),* ***Muslim*** *(2144/23). Erayadii Muslim.*